Su'aalo?

Ka waran haddii aan haddaba qaato daawada xannuunka jebisa?

U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad qaadaneyso daawooyinka xannuunka jebiya. Tani waxay ka caawineysaa dhakhtarkaaga inuu go'aamiyo daaweynta kugu fiican.

Intee jeer baad aniga I jeegareynaysaa?

Waxaa lagu jeegareynayaa daqiiqadihii yar ee kasta ilaa saacadihii yar ee kasta, iyadoo ku xiran xaaladaada. Waxaad sidoo kale riixi kartaa batoonka wecitaanka kalkaaliyaha mar alaale markii aad u baahato caawimaad ama aad dooneysid inaad cid aragto.

Yaa I jeegareynaya?

Kalkaaliyahaaga ayaa badanaa ku jeegareynaya, iyo dhakhtarkaaga ku daaweeya oo badanaa ku arki doona maalin kasta. Haddii lagu qalay oo aad isticmaaleysid daawooyinka xannuunka jebiya oo khaas ah, kalkaaliyayaasha iyo dhakhaatiirta ka socda Adeega Xannuunka daran ayaa sidoo kale ku soo booqan doona maalin kasta.

Tan micnaheedu miyaa xannuunkeyga oo dhami wuu iga tegi doonaa?

Inkastoo aan jeclaan lahayn inaan xannuunka oo dhan kaa qaadno, dhab ahaan badanaa dhammaan lagaama qaadi karo.

Waxaan u qasdeynaa inaan kaa dhigno mid aan dhibsan siduu yahay ilaa inta suurto galka ah, gaar ahaan markaad dhaqaaqeyso oo aad sameynayso waxyaalahaad sameynayso si aad u fiicnaato.

Daawooyinka xannuunku ma ii xun yihiin ama la qabsi ma leeyihiin?

Maya. Qaadashada daawooyinka xannuun jebiyaha ahi si ay u yareeyeen xannuunka wakhti gaaban ma aha waxaad la qabsan doonto. Si kastaba ahaatee, dhammaan daawooyinka waxaa laga yaabaa inay soo saaraan natiijadaan, saa daraadeed waa inaad u sheegtaa shaqaalaha caafimaadka, haddii aad jirato, aad hurdooto ama aad qabto wixii saameyn ah ee kale oo aad u maleynayso inay dhaliyeen daawooyinka xannuun jebinta.

Su'aalo intaas ka badan?

Ku qor halkan wixii su'aalo ah xusuusin ahaan si aad u weydiisid kalkaaliyahaaga ama dhakhtarkaaga

Maareynta xannuunkaaga

sidii aad noo caawin lahayd si aanu u yareyno xannuunkaaga

Somali

Afeef: Macluumaadkan caafimaadka waxaa loogu talagalay ujeedo waxbarasho guud ahaan oo keliya. Fadlan la tasho aqoon yahanka caafimaadka si aad u hubiso in macluumaadkani sax kuu yahay.

© xuquuqda xafidan waxaa iska leh dawlada gobolka Victoria. Wasaaradda Adeegyada bani'aadamka 2008. Qoraalkan waxaa laga yaabaa inaad si bilaash ah ku sii badan kartid iyadoo ah ujeedooyin waxbarasho ma aha kuwo faa'iido doon. Dukumiintigani waxaa sidoo kale lagu helayaa toban af oo kale waxaana laga heli karaa interneetka ah www.health.vic.gov.au/qualitycouncil/activities/acute/

Victoria The Place To Be

THE VICTORIAN QUALITY COUNCIL Safety and Quality in Health

Waan daneynaynaa xannuunkaaga- Adiguna waad na caawin kartaa xitaa…

Fahmida xannuunkaaga

Iyadoo la kontaroolayo xannuunkaaga, waxaan kugu caawin karnaa inaad u boqsooto si dhakhsa ah.
Si aan taas u sameyno, waxaan u baahan nahay inaan fahamno xannuunkaaga. Waxaan badanaa ku weydiin doonaa inaad xannuunkaaga darajadiisa noo sheegto.
Taas micnaheedu waxaa weeye inaad noo sheegto sidaad dareemeysid iyo xannuunku intuu leegyahay.
Macluumaadkani wuxuu naga caawinayaa fahamka si daad dareemayso iyo waxa sida wanaagsan kuugu shaqeynaya.

Darajeyna xannuunkaaga

Intaad isbitaalka ku jirto waxaa lagu weydiin doonaa inaad darajada xannuunkaaga sheegto. Siyaalaha ugu caamsan ee aad ku sheegaysaa xannuunkaaga waxaa weeye adoo isticmaalaya 'mastarada xannuunka' ama lambarka..mastarada xannuunku waxay leedahay batoon yar oo aad ku tilmaami karto meesha si aad u tusto xannuunka aad dareemeyso.
Dhigida tilmaamaha dhinaca bidix ee ugu danbeya ee mastarada waxay tilmaameysaa ' Wax xannuun ah ma leh', meesha midigta fogina waxay tilmaameyso 'xannuunkii kuugu xumaa weligaa', waxaan ku weydiin doonaa intaad dhigto tilmaamaha mastarada meesha sida fiican u matelaya inta xannuun ah ee aad dareemayso. Waxaan sidoo kale ku weydiineynaa inaad sheegto darajada xannuunkaaga ka dib markaad dhaqaaqdo ama qufacdo - si aan u aragno inay taasi wax isbedel ah keenayso.

Mastarada xannuunka

xannuun badani ma jiro

xannuun badan baa jira

Mastarada xannuunku qof walba kuma haboona. Meeshii iyada laga isticmaali lahaa waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad ku sheegto darajada xannuunkaaga lambar ahaan inta u dhaxeysa 0 ilaa 10

darajeynta xannuunka laga bilaabo 0 ilaa 10

xannuunka waxaa lagu cabiraa miisaan, laga bilaabo 0 ilaa 10, iyadoo 0 noqonayo 'Xannuun Ma leh' iyo 10 oo noqoneysa 'Xannuunkii kuugu darnaa weligaa'



Iyadoo sidoo kale darajeynta xoogga xannuunka ku haya, noo sheegida xannuunku meesha uu kaa hayo iyo sidaad dareemeyso (tusaale. Xannuun, gubasho leh, midi lagu geliyey oo kale ah) waxay naga caawineysaa inaan ogaano waxa dhalinaya xannuunka iyo sida ugu wanaagsan ee aanu u daaweyn laheyn.

Weydiiso xannuun jebiye

Weydiiso in lagu siiyo xannuun jebiye intuusan xannuunku kugu sii badan. Way adag tahay in la yareeyo xannuunka mar haddii uu bato. U sheeg kalkaalisadaada ama dhakhtarkaaga wixii xannuun ah ee aan soo fiicnaan xitaa haddii aad qaadatay daawada xannuun jebiyaha

Daaweynta xannuunkaaga

Waxaa laga yaabaa in loo daaweeyo xannuunkaaga siyaalo kala duwan. Waxay ku xiran tahay nooca iyo goobta xannuunka iyo waxa adiga kuu shaqeynaya . La hadal kalkaalisadaada iyo dakhtarkaaga si aan u go'aansano daaweynta ugu wanaagsan ee xannuunka.

Doorashooyinka kuu bannaan waxaa ka mid ah:

- **Kiniini**
- **Irbad mar mar ah**
- **Faleebo joogta ah oo daawaca xannuunka ah**
- **Analgesia uu kontaroolayo bukaanku (PCA)** – qadar yar oo ah daawada xannuunka oo aad adigu kontaroosho.
- **Suuxdin meeshaas ku xanuuneysa oo keliya ah** – oo lagaaga sameynayo nabarkaaga agtiisa si loo joojiyo xannuunka
- **Epidural/lafdhabarta** – oo lagaa siinayo dhabarka si loo joojiyo xannuunka
- **Farsamooyin khaas ah** – oo la isticmaalo si loo yareeyo xannuunka.